

TILMAAMAHA QASHINKA IYO DIB U WARSHADAYNTA QASHINKA EE BOSTON

Waxaanu bixinaa adeegga dib u warshadaynta iyo uruurinta qashinka dadka degan xaafadaha City of Boston.

Waxaa ku lifaaqan kal-tirsiga qashinka ee 2020

CITY of BOSTON

1395-20



WASTE
REDUCTION

EE QASHINKA
APP-KA
MAALINTII

BOS:311



Jaarkeena qaaliga ah:

Maamulkayga waxaa si wayn uga go'an inay Boston ka dhigaan meel cagaaran, oo magaalo waara. Waxaa naga go'an in aanu noqono meel kaarboonka muquunisa marka la gaaro 2050, oo waxa aanu u diyaarinay xaafadaheena saamaynta isbadalka cimilada. Waxaanu sidoo kale ka shaqaynaynaa in aan Magaaladeena ka dhigno mid Qashinka ka Madhan.

Waxa aanu ku faanayaa in sanadkii lasoo dhaafay in aan hirgelinay Qorshaheena ugu horeeyay ee ka Madhnaanshaha Qashinka. Samaynta 30 xeeladood ee wakhtiga dhaw iyo mudada dheer ah oo markaa lagu doonayo in lagu yareeyo isticmaalkeena khayraadka dabiiciga ah, kordhinta xadiga agabka aanu warshadaynayno iyo qashinka aan dib u warshadayno, in la yareeyo xadiga qashinka ee aanu u dirayno xarumaha qashinka tamarta u badala. Marka aanu qaadno talaabooyinkan, waxa aan in ka badan sadex jeer jibaari karnaa xadiga qashinka ee aan burburino iyo dib u warshadaynta boqolkiiba 25 inta aanu ka qaadno gaadhsiinaynaa boqolkiiba 80.

Tani waa talaabo wayn. Si guul looga gaadho, waxaanu ka doonaynaa dadka deegaanka, mulkiilayaasha ganacsiga, iyo booqdayaashu inay ka qayb galaan oo ay qaybtooda ka gaystaan. Si looga caawiyo inay dadka bilaabaan, City of Boston dagaal gobolka oo dhan ah, oo ay markaa hogaaminayso Waaxda Massachusetts ee Ilaalinta Deegaanka, waxay bilawday olole waxbarasho oo cusub oo loo yaqaan Recycle Smart (Dib u Warshadaynta Caqliga Leh). Yoolku waa in la xaqiijiyo in dadku ay sida saxda ah dib u warshadeyaan. Waxaanu doonaynaa in aan idin sheegno shayada dib loo warshadayn karaa, iyo shayada aan dib loo warshadayn karin, oo ay ku jiraan alabaadka markaa ku xanibmaya mishiinka xarunta dib u warshadaynta qashinka, kaas oo markaa yaraynaya wax ku oolnimada nidaamka.

City of Boston waxay sidoo kale bixisaa Trash Day App oo bilaash ah oo si fudud loo isticmaali karo. Waxa uu u sahlaa dadka reer Boston inay baadhaan hagaha boqolaal shay oo qoysku leeyahay si ay markaa wax uga ogaadaan sida saxda ah ee loo daadinayo. Isticmaalayaasha App-ku waxa ay eegi karaan taariikhaha laga qaadayo guriyaashooda, waxa ay ku buuxsan karaan xasuusin, oo waxa ay heli karaan wargelin jadwalka ah.

Tilmaamahan waxaa diyaariyay Waaxda Hawlaha Guud ee Yaraynta Qashinka Magaalada Boston. Waxa uu qayb ka yahay dadaalka lagu balaadhinayo wacyi gelinta. Tilmaamahan waxaa kamid ah macluumaad muhiim ah oo ku saabsan dhammaan adeegyada la siiyo dadka deegaanka, oo ay ku jiraan taariikhda la qaadayo qashinka caleemaha iyo beerta, dib u warshadaynta cuntada, iyo muunasabadaha qaadista qashinka waxyeelo uu keeni karaa qoyska.

Waxa aan ka dalbanayaa dadka deegaanka inay akhriyaan waraaqahan si taxadir leh. Waxa aad dhigataa meel aad si fudud uga heli karto si aad markaa badanaa u tixraaci karto. Hadii aynu dhamaanteen sida Saxda ah Dib u Warshadaynta Qashinka, waxa aanu gaadhaynaa yoolkeena: in Magaalada Bilaa Qashin laga dhigo. Marka aynu yeelano habdhaqanka cagaarka ah maanta, waxa aanu xaqiijin karnaa in jiilka cusub ee Boston uu caafimaad qabo.



Mahadsanid,

Mayor Martin J. Walsh

TUSMADA QORAALKA

EBER QASHIN	1
TRASH DAY APP	1
TILMAAMAHA DIB U WARSHADAYNTA	2
TILMAAMAHA QASHINKA	5
DIB U WARSHADAYNTA HADHAAGA CUNTADA	8
KU DEEQIDA AGABKA QOYSKA	8
QAADISTA QASHINKA WAXYEELADA LEH	9
SHAYADA AAD DIB U WARSHADAYN KARTO	10
SHAYADA AANAD DIB U WARSHADAYN KARTID	11
KAL-TIRSIGA QASHINKA BARAXADA 2020	12



EBER QASHIN

Eber qashinku waxa uu ka dhigan yahay yarayn, dib u hagaajin, iyo dib u isticmaal alaabaadka meesha aan ku nool nahay. Barnaamijka Eber Qashinka ee Boston wuxuu ku dadaalaa in Boston uu ka dhigo bilaa qashin inta uu sameeyo qorshayn, xeerka, iyo wada shaqaynta bulshada.

Qorshaha Eber Qashinka Boston waxa uu sameeyay tilmaamo uu markaa Boston kaga dhigayo magaalo bilaa qashin ah. Taasi waxay ka dhigan tahay in Boston ay yarayn doonto, dib u isticmaali doonto, dib u warshadayn doonto, oo ay markaa dib u warshadayn doonto ilaa boqolkiiba 80 ilaa 90 qashinkeeda adkaha ah. Waxa aanu sidoo kale yarayn doonaa dhulka qashinka iyo meelaha lagu gubo.

Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa boston.gov/zero-waste

TRASH DAY APP

Barnaamijka bilaashka ah ee Trash Day app, waxaad ka eegi kartaa taariikhda gurigaaga laga qaadayo, waxa aad ku buuxsan kartaa xasuusin, waxaad ka heli kartaa wargelin isbadalka jadwalka ah. Waxa aad ka baadhaa hagaha boqolaal shay oo qoyska ah si aad markaa uga ogaato qaabka ugu wanaagsan ee aad qashinka ku daadin karto.

Waxa aad sidoo kale isticmaali kartaa app-ka si aad u hesho qaab lagaaga qaadi karo qashinka iyo qashinka dib loo warshadaynayo taas oo dib loo dhigay maadaama oo ciid uu kusoo beegmay, iyo inaad ogaato taariikhda la uruurinayo ee ugu danbeeya fasaxyada.

Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa boston.gov/trash-day

TILMAAMAHA DIB U WARSHADAYNTA

DIB U WARSHADAYNTA QASHINKA EE TRASH DAY

Waxa aad ku buuxsataa dib u warshadaynta qashinka 6 subaxnimo isla maalinta aad ku buuxsatay qashinka. Hadii qashinka lagaa qaado laba jeer todobaadkii, waxa aad ku qorataa labada maalmoodba. Waxa aad kala saartaa wixii dib loo warshadaynayo iyo qashinka kahor inta aanad jidka dhigin, fadlan biyo raaci oo maydh alaabahaaga.

IKHTIYAARKA WEELKA DIB U WARSHADAYNTA QASHINKA

Dhammaan alaabaadka dib loo warshadaynayo waa in la raaca mid kamid ah ikhtiyaarada soo socda:

1. Gaari gacan oo taayaro balaadhan leh

Hadii meesha aad degan tahay uu yahay guryaha dabaqa lixaad ama ka hooseeyo, Magaalada ayaa ku siinaysa Gaari gacan oo taayaro balaadhan leh.

Gaari gacamahaan way balaadhan yihiin oo markaa waa in loo riixo gaadhiga halka loo qaadi lahaa. Fadlan ku xisaabtan tilmaamahan:

- Si qaab fudud loogu saari karo, waxa aad hor dhigtaa gaari gacan guriga jidka cagta agteeda, oo waxa aad ka fogaysaa meelaha gaadiidka la dhigto iyo hantida gaarka loo leeyahay.
- Inta lagu jiro jiilaalka, waxa aad garab ama daba dhigtaa gaari gacankaaga kaydka barafka. Gaari gacanka ha dhigin kaydka barafka gadaashiisa.

2. Badalida daasadaha qashinka ah

Waxaad u badali kartaa daasadaha qashinka weelka dib u warshadaynta adiga oo ku dhajinaysaa waraaqaha dib u warshadaynta banaanka. Daasadaha dib loo warshadaynayo waa inayna ka waynaanin 32 galaan. Hadii ay ka waynaadaan, waa in aan ku lifaaqdaa mishiinka lagu qaado ee gaadhiga dib u warshadaynta.

Waxa aad dalban kartaa waraaqaha dib u warshadaynta ee rasmiga ah ama gaari gacanka dib u warshadaynta (taas oo markaa la ansixinayo) taas oo markaa laga helo BOS:311 adiga oo garaacaya **3-1-1** ama **617-635-4500**. Booqo **[boston.gov/311](https://www.boston.gov/311)** wixii macluumaad ee dheeraad ah.

3. Baco caag ah oo nadiif ah

Bacaha caaga ah ee nadiif ah ayaa kaliya loo ogol yahay hadii ayna jirin meel ku filan oo markaa ka banaan caagaga buluuga ah ee dib u warshadaynta ee xaafadaha soo socda:

Back Bay/Bay Village, Beacon Hill, Charlestown, Chinatown, Downtown, East Boston, Fenway, Mission Hill, North End, Roxbury, South Boston, the South End, iyo West End.

Fadlan ogoow: Bacuhu waa inay noqdaan 32 galaan ama wax ka yar. **Ha** ku ridin wixii dib loo warshadaynayo bacaha raashinka ee caaga ah. Bacaha cad ee dib u warshadaynta waxaa laga heli karaa dukaamada deegaanka.

Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa [boston.gov/recycling](https://www.boston.gov/recycling)

DIB U WARSHADAYNTA QASHINKA DHISMAYAASHA WAAWAYN IYO DABAQYADA GURYAHA AH

Dhismayaasha leh wax ka badan lixda guriga ee deganaansho waxaa loo arkaa inay wayn yihiin. Dhismayaasha waawayn ee markaa leh adeegyada qaaditaanka qashinka Magaalada waxaa looga baahan yahay barnaamijka magaalada ee dib u warshadaynta inay yeeshaan.

Mulkiilayaasha dhismayaasha waawayn ama ururada guryaha dabaqyadu waa inay bixiyaa oo ay markaa u diyaariyaan gaari gacamaha waawayn ee taayarada leh kuwaas oo markaa la dhigayo meel dhexe oo dhammaan dadka degan dhismaha u dhax ah. Si aad ugu dalbato dhisme wayn dib u warshadaynta qashinka, la xidhiidh BOS:311 adiga oo garaacaya **3-1-1** ama **617-635-4500**.

SHAYADA DIB LOO BURBURINAYO EE LAGU DIRAYO GAARI GACANKA BULUUGA AH

Xasuus mar kasta inaad **biyo raacisid oo aad maydho** kahor inta aanad ku ridin gaari gacanka dib u warshadaynta.

- **Kartoonada biitsaha:** ka saar cuntada, biitsada ku hadhay (qurubyada biitsaha), iyo inta kala qaybisa
- **Almuuniyeemka iyo daasadaha:** waxaa ku jira daasadaha baradhada shiilan iyo bunka
- **Waraaqo:** joornaalada, majaladaha, kaataalooqyada, buugaagka waraaqaha ah, waraaqaha cad iyo kuwa midabka ah
- **Kartoono:** bushqada waraaqaha ah, kartoonada beedka, iyo kartoonada hadhuudhka
- **Quruurado:** quruurada afka balaadhan iyo quruuradaha
- **Caag:** dhammaan weelasha (marka tala tago caaga), oo ay ku jiraa cuntada, soodhaha, caagadaha biyaha, iyo quruuradaha afka wayn

SHAYADA DIB AAN LOO WARSHADAYNAYNIN EE LAGU DIRAYO GAARI GACANKA BULUUGA AH

- **Bac niikada dukamaysiga:** bac niikada iyo bacaha qashinka (waxa aad kusoo celisaa bacaha oo nadiif ah dukaanka si mar kale loo isticmaali karo)
- **Shayada la daadiyo:** buushka, koobabka, sahamada, af-marka, istiraashoyinka, tuunbada wax lagu cabo, iyo bacaha bunka
- **Bacaha duubka:** baco wax lagu duubo oo buush buush ah, bacaha cuntada lagu daboolo, iyo bacaha waawayn
- **Tuunbo:** aan koodhadhka laga soo laalaadin, tuunbada, meelaha balaadhinka iyo hadhkaha, ama sil silada
- **Qashinka dawooyinka:** sirinjiyada iyo kiniinka
- **Weelka:** weelka gaarka ah ee loo isticmaalo kiimikada iyo saliid gaariga
- **Elektorooniga:** baytariyada dib loo dabeeyo iyo guluubyada laydhka
- **Dharka:** oo ay ku jiraan kabaha iyo boonbalayaasha
- **Kartoonada sharaabka iyo cuntada:** kartoonada sharaab, caano, iyo cuntada la barafeeyay (weelka sharaabka iyo caanaha ee caaga ah waa CAADI, hadii si wanaagsan loo maydho)
- **Marmar:** dhoobo, huudhi iyo quruurado
- **Qashinka cuntada**

Waxa aad ka eegtaa boga 10 iyo 11 ee tilmaamaha dib u warshadaynta qashinka lifaaqa ah.

TILMAAMAHA QASHINKA

SIDA AAD U DIYAARINAYSO QASHINKAAGA

1. Qashinka waxaa si wanaagsan loogu kaydin kartaa foostada ama weelka yaala gurigaaga. Foostada ama weelku waa inuu:

- noqdaa bir ama ka samaysan yahay caag adag
- yeeshaa dabool
- ka badanayn 32 galaan (iyada oo la geli karo birta lagu qaado moojee, oo markaa waxa ay noqon kartaa ilaa 96 galaan), iyo
- miisaankiisu ahayn wax ka badan 50 bowndhis.

2. Qashinka waa in la dhigaa jidka cagta agteeda **ugu danbayn 6 subaxnimo, ama wixii ka danbee 5 galabnimo habeenka ka horeeya** maalinta la qaadayo.

3. Dhammaan qashinka waa in lagu dhax ridaa foostada iyo weelka. Hadii aad isticmaalayso bacaha qashinka, waa inay noqdaan .9 mil ama wax ka badan caagu oo kamana badan karo 32 galaan.

4. Qashinka waxa aad ku ridaa bacaha qashinka, baco miikada, bushqadaha waraaqaha ah, ama kartoonaada lama ogola, oo waxa ay keeni karaan xad gudub xeerka ah.



Shayada qaar laguma diri karo qashinka caadiga ah ama dib u warshadaynta qashinka. Laakiin, waa in dib loogu sameeyo jadwalka qaadida gaarka ah. La hadal **3-1-1** ama **617-635-4500** ama booqo **boston.gov/311** si aad u qabato balanta in lagaa qaado shayadan:



SHAASHADA
KUMBIYUUTAR



MUKAYFKA



HAWO
QABOOJIYAHA



TELEFIISHIN



QABOOJIYAHA
BIYAHA



TALAAGAD

SHAYADA AANAD KU RIDI KARIN QASHINKA AMA DIB U WARSHADAYNTA QASHINKA

Hadii shayadan dib loo isticmaali karo, ku deeq. Hadii kale, waa inaad shirkad gaar ah oo kaa qaado lacag siisaa.



JAAJUURKA



ISBEERKA
GAADIIDKA



CAMUUDA,
IYO DHAGAXAANTA



HADHAAGA
DANBA



AGABKA DHISMAHA
IYO WIXII LA DUMIYAY



FOOSTOYINKA
SALIIDA



QASABADAHA
AGABKA
DHAJISKA



SIRINJIYADA IYO
IRBADO



QASHINKA
DAREERAHA AH
hadii ay ka badan yihiin
galaan; oo ay ku jiraan
saliida cuntada



QASHINKA
CUNTADA



KULAYLIYAHA
BIYAHA



AGABKA
WAXYEELADA LEH



MARMAR



SAXARO

CALEEMAHA IYO QASHINKA BEERTA

QAADITAANKA CALEEMAHA IYO QASHINKA BEERAHA XILIYEEDKA

Caleemaha iyo qashinka beeraha waxaa la qaadaa inta u dhaxaysa Abriil ilaa Diseembar todobaadyada loogu talo geley ee qaadida qashinka. Waa kuwan waxoogaa tilmaamo ahi:

- Waxa aad qashinka caleemaha iyo wixii beerta ah ku diraa kartoon wayn ama footo dusha furan oo ay ku qoran tahay "qashinka beerta" (ha isticmaalin bacaha caaga ah).
- Waxa aad u heli kartaa waraaqaha dhajiska ee qashinka foostada adiga oo la xidhiidha BOS:311. Garaac **3-1-1** ama **617-635-4500**, ama booqo **boston.gov/311**. Waxa aan u ogol nahay ilaa shan waraaqo oo dhajis ah qoyskiiba. Bacaha caleemaha ah ee waraaqaha ah looma baahna in la calaamadiyo.
- Laamaga geedaha Laamaha geedaha oo ah ugu badnaan 3 fuudh dhererkoodu oo ah 1 inji ugu badnaan cabirkoodu.
- Waxa aad dhigtaa qashinka jidka cagtu marayso agteeda **6 subaxnimo maalinta todobaadkii ee la qaadayo, ama wixii ka danbeeya 5 galabnimo habeenka ka horeeya** maalinta la qaadayo.
- Waxaanu sidoo kale qaban doonaa 20 munaasabaddood oo la keenayo xarumaha lagu burburiyo ee Mattapan. Booqo **boston.gov/yard-waste** ee taariikhaha.

Hadii aad leedahay laba maalmood oo dib loo burburiyo todobaadkii, uruuri caleemaha iyo qashinka beerta waa **keliya maalintaada kowaad** ee warshadaynta todobaadkii. • Ma qaadno caleemaha iyo qashinka beerta maalmaha aan la qaadin qashinka beerta todobaadkii.

Wixii taariikhaha qaadida ah, booqo **boston.gov/yard-waste**

GEEDAHA KIRISMASKA

Waxa aanu qaadnaa geedaha Kirismaska laba todobaad oo dhan Janaayo ah kadib ciida Kirismaska. Hadii aad leedahay laba maalmood oo todobaadkii lagaa qaado qashinka dib loo warshadaynayo, waxa aanu qaadaynaa geedka maalinta kowaad ee qashin warshadaynta. Waxa aad ku diyaarisaa geedkaaga jidka cagtu marayso agteeda ee maalintaada dib u warshadaynta qashinka. Ha ilaabin in wixii qurxin ah aad gurto, xadhka, laydh iyo taagaga. **Haku ridin bacdaada geedka.**

QASHINKA HADHAAGA CUNTADA

DAADINTA BULSHADA

Daadinta waxaa weeye daadin la ilaaliyay oo agabka dabiiciga ah, sida qashinka beerta iyo hadhaaga cuntada ah. Daadintani waxaa weeye qaab wayn oo yareeyo qashinka oo markaa loo soo saaro nafaqo camuuda ah oo markaa dabiici ah.

Mashruuca Oscar waa barnaaj daadinta cuntada ah oo City of Boston. Weel wayn, foostooyinka qashinka oo dib loo habeeyay, ayaa dadka loo diyaariyaa si ay markaa ugu daadiyaan wixii qashin ah ee dabiici ah ee gurigooda.

Booqo boston.gov/project-oscar

KU WARSHADAYNTA CUNTADA EE GURIGA

Khayraadka Dhismaha Boston, waxa aad ka iibsan kartaa caaga kaabista lagu sameeyay ee warshadaynta cuntada madbakha iyo baaldiga hadhaaga ah. Gaari gacanka iyo baaldiga waxaa lagu heli karaa iib Isniin ilaa Sabti, 9 subaxnimo. - 3 galabnimo, ee Khayraadka Dhismaha Boston oo ay ku yaal 100 Terrace Street ee Mission Hill. La xidhiidh BOS:311 adiga oo garaacaya **3-1-1** ama **617-635-4500**, ama booqo boston.gov/compost wixii macluumaad ee dheeraad ah.

KU DEEQIDA AGABKA QOYSKA

Fadlan waxa aad isla eegaan inaad dib u isticmaashaan dharka, agabka guriga, iyo agabka yaryar oo aad markaa siisaan ururada samofalka. Waxa aad sidoo kale booqan kartaa boston.gov/recycling wixii macluumaadka ugu danbeeyay ee macluumaadka barnaamijka dib u warshadaynta dharka City of Boston.

Ma doonaysaa inaad u deeqdo albaabo, daaqado, ama agabka suuliga? Waxa aad ka eegtaa Khayraadka Dhismaha Boston ee bostonbuildingresources.com

GAYNTA QASHINKA WAXYEELADA LEH

Waxa aanu leenahay maalmo la geeyo qashinka waxyeelada leh ee qoyska sanadkii. Dadka degan Boston waxa ay si amaah ah u daadin karaan qashinka waxyeelo leh iyo googo'a waraaqaha aan loo baahnayn iyada oo bilaash ah. Fadlan ogoow:

- Waxaanu kaliya ka qaado doonaa **dadka reer Boston**. Waxaa waajib ah inaad na tusto cadaynta deganaanshah. Wax qashin ah kama qaadi doono ganacsigaaga.
- **Caaaga iyo rajniga acrylic** MAAHA kuwa waxyeelada leh. Inta aad daasada ku dhax qalajiyo ranjiga waxa aad markaa ku diraa qashin qubka caadiga ah.
- Waxaanu bixinaa **jarjaraha waraaqaha** dhamaan munaasabadaheena. Waxa aanu jarjari doonaa ilaa 10 nuqulka oo waraaqo ah oo markaa cabirka kartoonka ah ama weelasha waraaqahaaga shakhsi ahaaneed.
- Waxaanu aqbalnaa dhamaandharka **iyoo marooyinka**, ay ku jiraan surwaalo, koodhadh, koofiyo iyo suudhasha.
- Waxaad sidoo kale **dib u warshadayn kartaa** wixii elektorooniga ah munaasabadahan. Kama qaadno alaabaadka la iibinayo ganacsiyada.

Si aad wax badan uga ogaato waxa aanu aqbalno iyo waxa aanaan aqbalin, booqo **boston.gov/hazardous-waste**

DAWOYINKA IYO SIRIINJIYADA

Miyaad ka heshey siriinji ama irbad jidka? Si aad si amaah ah ugu tuurto, la xidhiidh BOS:311 adiga oo garaacaya **3-1-1** ama **617-635-4500** si ay kaaga caawiyaan.

Ma waxa aad haystaa dawooyin aan la isticmaalin ama dhacay?

Waxaa jira Meelo Dawooyinka Lagu uruuriyo (MedReturn Drug Collection Kiosks) oo ku yaala 11 Boston Police Department Stations. Meelahani waxa ay u furan yihiin dadka oo dhan, 24 saacadood maalintii, todoba maalmood todobaadkii – waxbana la iskama waydiiyo. Booqo **boston.gov/drug-kiosks**

SHAYADA AAD DIB U **WARSHADAYN** KARTO



KARTOONADA BIITSAHA

Ka saar cuntada, biitsada ku hadhay (qurubyada biitsaha), iyo inta kala qaybisa



ALMUUNIYEEMKA IYO DAASADAHA

Waxaa ku jira daasadaha barashada shiilan iyo bunka



WARQAD

Waraaqaha cadaanka ah iyo kuwa midabka ah



KARTOON

Bushqada waraaqaha ah, kartoonaada beedka, kartoonaada siriyeeelka, iwm.



QURUURADO

Quruurada afka balaadhan iyo quruuradaha



CAAGA

Dhamaan weelasha (marka tala tago caaga), oo ay ku jiraa cuntada, soodhaha, caagadaha biyaha, iyo quruuradaha afka wayn, iwm.



KARTOON

Isku diis oo markaa sin kartoona (waxaan ka badnayn 3 fuudh iyo 3 fuudh; waa in la isku xidhaa oo la is raaciyaa)



BUUGAAGTA

Buugaagta waraaqaha ah



DAABACAADO

Wargeysyo, majalad, iyo kaatalooga

SHAYADA AANAD DIB U WARSHADAYN KARTID



QASHINKA DAWOOYINKA

Siriinji, kiniin, iwm.



SHAYADA LA DAADIYO

Buushka, kilinikiska,
kilinikis, tuunbada wax lagu
cabo, bacaha bunka, iwm.



WEEL

Kiimikada iyo
saliid injiinta




ELEKTOROONIG

Waxaa kamid ah wixii la
dabayn karo baytaryada
iyo guluubyada laydhka



BAC MIIKADA

Gacmiikada iyo bahaca qashinka
(waxaad kusoo celin kartaa tukaanka
adiga aad soo maydho si mar kale
uu u isticmaalo)



DUUBKA CAAGA

Waxa ku jira waxa wax
lagu duubo, filimaanta,
iyo bacaha waawayn



DHARKA

Waxaa ku
jiraan kabaha
iyo caruurasuhu



KARTOONADA SHARAABKA IYO CUNTADA

Sharaabka, caano, iyo kartoonada
cuntada la barafeeyay (caaga
sharaabka iyo weelka caanaha
waa la ogol yahay hadii si
wanaagsan loo maydhay)



TARGALKA

Aan koodhadhka laga soo
laalaadin, tuunbada, meelaha
balaadhinka, hadhkaha,
ama silisyada



MARMARKA

Dhoobo, huudhi
iyo quruurado



QASHINKA CUNTADA

☑ **SAMEE:**

- Waxa aad qashinka calcemaha iyo wixii beerta ah ku diraa kartoon wayn ama fooro dusaha furan oo ay ku qorran tahay "qashinka beerta."
- Kaamaha geedaha oo markaas 3 fuudh ugu badnaan le'eg iyo 1 inji balacooda
- Waxaad ku ridaa foosho, bac, iyo meelaha lugtu marka waxa garab yaala 6 subaxnimo ugu danbayn.

☒ **HA SAMAYNIN:**

- Baco aan caag ahayn
- Haku rdin laamaha foostoyin
- Ciid lama ogola

① **FIRO GAAR AH:**

- Hadii aad leedahay laba maahmood oo dhib loo birturyo todobaadkii, uuuri maalinada kowaad ee warshadaynta todobaadkii
- Ma qaadno calcemaha iyo qashinka beerta maalinaha aan la qaadin
- Waxaanu qaadnaa geedaha kirisnaska laga iinta u dhaxaysa Janaayo 4 – 15, 2021

① **INUU GURIGA KU QUDHMO:**

Waxaad ka ihsan kartaa dhas binka daarada danbe iyo baalifiga mabalkaha:
 Boston Building Resources
 100 Terrace St. Mission Hill, Roxbury
 Wixii xog dheerada ah, qaboo:
boston.gov/trash

■ Qaadihaanka calcemaha iyo qashinka beerta

■ Gaynta qashinka waxyeelada leh ee goyska

■ 2021 Uruurinta geedka

■ Yard Waste drop off
 500 American Legion Hwy, Boston, MA 02131

ABILL

SU	M	TU	W	TH	FR	SA
	1	2	3	4		
5	6	7	8	9	10	11
12	13	14	15	16	17	18
19	20	21	22	23	24	25
26	27	28	29	30		

MAAJO

SU	M	TU	W	TH	FR	SA
	1	2				
3	4	5	6	7	8	9
10	11	12	13	14	15	16
17	18	19	20	21	22	23
24	25	26	27	28	29	30
31						

JUUN

SU	M	TU	W	TH	FR	SA
	1	2	3	4	5	6
7	8	9	10	11	12	13
14	15	16	17	18	19	20
21	22	23	24	25	26	27
28	29	30				

JULAY

SU	M	TU	W	TH	FR	SA
	1	2	3	4		
5	6	7	8	9	10	11
12	13	14	15	16	17	18
19	20	21	22	23	24	25
26	27	28	29	30	31	

OGOOOSTO

SU	M	TU	W	TH	FR	SA
						1
2	3	4	5	6	7	8
9	10	11	12	13	14	15
16	17	18	19	20	21	22
23	24	25	26	27	28	29
30	31					

SATEEMBAR

SU	M	TU	W	TH	FR	SA
	1	2	3	4	5	
6	7	8	9	10	11	12
13	14	15	16	17	18	19
20	21	22	23	24	25	26
27	28	29	30			

OKTOOBAR

SU	M	TU	W	TH	FR	SA
						1
2	3	4	5	6	7	8
9	10	11	12	13	14	15
16	17	18	19	20	21	22
23	24	25	26	27	28	29
30	31					

NOOFAMBER

SU	M	TU	W	TH	FR	SA
	1	2	3	4	5	6
7	8	9	10	11	12	13
14	15	16	17	18	19	20
21	22	23	24	25	26	27
28	29	30				

DISEEMBAR

SU	M	TU	W	TH	FR	SA
		1	2	3	4	5
6	7	8	9	10	11	12
13	14	15	16	17	18	19
20	21	22	23	24	25	26
27	28	29	30	31		

JANUARY 2021

SU	M	TU	W	TH	FR	SA
						1
2	3	4	5	6	7	8
9	10	11	12	13	14	15
16	17	18	19	20	21	22
23	24	25	26	27	28	29
30	31					

MEELAHA LA GAYNAYO QASHINKA GOYSKA EE WAXYEELADA LEH

JUUN 20 | SOUTH BOSTON
 Central DPW facility
 400 Frontage Rd.

JULAY 25 | WEST ROXBURY
 West Roxbury DPW
 315 Gardner St.

AGOOSTO 11 | DORCHESTER
 John W. McCormick middle school
 315 Mt. Vernon St.

AGOOSTO 22 | SOUTH BOSTON
 Central DPW facility
 400 Frontage Rd.

OKTOOBAR 31 | SOUTH BOSTON
 Central DPW facility
 400 Frontage Rd.

City of Boston waxaa ka go'an inay ka dhigto Boston meel bilaa qashin ah. Waxa aad naga caawisaa in aanu gaadhno yoolkaas adiga oo yaraynaya, haggajinaya, oo dib u isicmaalaya kahor inta aan dib loo warshadayn ama la tuurin. Waxaad macluumaad dheeraad ah ka heli kartaa boston.gov/zero-waste



KU DEEQ

Waxaad ku deegdaa wixiti aamad doonaynin halka aad ka tuuri lahayd



HA WASAKHAYNIN

Soo dejiso Boston **Trash Day App**, si aad wax uga ogaato shayada dib loo warshadayn karo iyo kuuda aan la warshadayn karin



BURBURI

Waxa aad jartartaa dhamaan kartoonada kahor inta aamad dib u warshadayn



MA NADIIFBAA?

Biyo ku nadiifi kahor inta ay sshayga la warshadayn waxa aad ku ridaa dasbitinka buluuga ah

CITY of BOSTON

Mayor Martin J. Walsh



WASTE
REDUCTION



EE QASHINKA
APP-KA
MAALINTII

BOS:311